KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sanñadka 2aad | Tr. 1 Agosto 1974 | L. 8

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa il danayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 20 Tr. 1 Juunyo 1974 — *Meelmarin heshiis daynta Jarmarka ee Soomaltex.* Bog. 340

SHARCI L. 21 Tr. 5 Juunyo 1974 — *Meelmarinta heshiisyada deynta horumarinta Xoolaha ee Juba.* » 341

SHARCI L. 22 Tr. 18 Lulyo 1974 — *Isbaddelkii 1aad Miisaaniyadda 1974.* » 342

SHARCI L. 23 Tr. 18 Lulyo 1974 — *Magacaabid Gobolka Banadir.* » 346

SHARCI L. 24 Tr. 18 Lulyo 1974 — *Toosinta Sharciga Wakaaladda horumarinta Xoolaha ee lambarkiisu yahay 34 Soo baxay 26 Juun 1970.* » 347

LAW No. 24 of 18 July 1974 — *Amendment to law No. 34 of 26 June 1970, Governing Livestock Development.* » 352

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 17 Maarso 1974, L. 63 — *Magacaabid* [illegible]

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 17 Abrile 1974, L. 64 — *Dallacaad la siiyay Dhamme Moxamed Jaamac Ducaale derejada Gaashaanle.* Bog. 359

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 17 Abrile 1974, L. 65 — *Dallacaad la siiyay Dhamme Jaamac Cali Maax derejada Gashaanle.* » 361

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 17 Abrile 1974, L. 66 — *Dallacaad la siiyay Dhamme Axmed Xasan Xuseen derejada Gaashaanle.* » 362

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 18 Juunyo 1974, L. 67 — *Magacaabid Guddoomiyaal Degmo.* » 363

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 18 Juunyo 1974, L. 68 — *Magacaabid idaaradda Gudiga Kacaanka beesha.* » 365

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 24 Nofember 1973, L. 69 — *Siismo dhul la siyay Dugsi Sare iyo Masjid, (Diini ah) lagu magacaabay (Shikh Nuur).* » 366

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 30 Dishember 1973, L. 70 — *Siismo dhul Dawladeed la siyay Naji Salax Abubakar.* » 367

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 21 Abrile 1974, L. 71 — *Siismo dhul la siyay Jaalle Aamin Cumar Elayeh.* » 368

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 18 Majyo 1974, L. 72 — *Guri daar ah oo ay gadatay Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta kuna yaal Magaalada Ceel-Dheer.* » 369

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 18 Majyo 1974, L. 73 — *Siismo dhul Dawladeed la siyay Jaalle Xashi Cali Hoshi, Xafadda Hodan Mq. 405.* » 370

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUU, Tr. 2 Juunyo 1974, L. 74 — *Siismo dhul Dawladeed la siyay Jaalle Axmed Maxamud Cadde kuna yaal magaalad Xamar Xafadda Hodan.* » 372

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUU, Tr. 2 Juunyo 1974, L. 75 — *Siismo dhul Dawladeed la siyay Jaalle Xaji Cabdalla Cali (Jaraadi) kuna yaal magaaladda Baydhaba.* » 373

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN. OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis dhumid Jeeg L. 048199 — *Taliska Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed. (161)* Bog. 375

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis dhumid Buugga L. 1286 — *Xamuud Axmed Cali. (162)* » 376

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis dhumid Buugga L. 1.61 — *Cusman Cabdalla Abikar. (163)* » 377

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED, Ogeysiis Heerka *Sarrifka Lacagaha Qalaad. (164)* » 377

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED, Ogeysiis Heerka *Sarrifka Lacagaha Qalaad. (165)* » 378

S.I.C.S., S. p. A. — Iska Shadata Warshadaha Ganacsiga Soomaaliyeed Muqdisho — *Ogeysiis Isugu yeerid fadhiigu guud oo caadiga ahaa iyo kan caadiga ahayu. (166)* » 379

# BOGGA KOWAAD

## SHARCI

**SHARCI L. 20, Tr. 1 Juunyo 1974.**

**Meelmarin Heshiis daynta Jarmalka ee Soomaltex.**

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

HADDUU MAQLAY Golaha Xoghayayaasha;

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA HOOS KU QORAN

**Qodobka 1**

*Meelmarin Heshiis*

Heshiiska Deynta ee dhexmaray Marso 7, 1974 Jamhuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaliya iyo Bankiga Dhismaha ee Jarmalka (Kreditanstalt fuer wiederaufbau) waa la Xeeriyey.

Qodobka 2

*Dhaqan Gelin*

Sharcigani dhaqso ayuu u dhaqan gelayaa waxaana lagu qorayaa faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, Juunyo 1, 1974.

*Jaalle S. G. Moxamed Siyaad Barre*
GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Maxamed Yusuf Weyrax*
Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda

**SHARCI L. 21, Tr. 5 Juunyo 1974.**
**Meelmarinta Heshiisyada Deynta Horumarinta Xoolaha ee Juba.**

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

HADDUU MAQLAY Golaha Xoghayayaasha;

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka;
WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA HOOS KU QORAN

Qodobka 1

*Meelmarin Heshiis*

1. Heshiisyada soo socda ee ku saabsan hirgelinta Mashruuca Horumarinta Xoolaha ee Jubada Hoose waa la meelmariyey.

a) Heshiiska Daynta ee Jamhuriyadda Dimuqradiga ee Soomaaliya iyo Ururka Horumarinta ee Dowligga (IDA) ah dhexmaray Feberwari 20, 1974.

b) Heshiiska Mashruuca ee Ururka Horumarinta iyo Wakaaladda Horumarinta Xoolaha dhexmaray Feberwari 20, 1974.

c) Heshiiska Deyn-gudbinta ee Dawladda Soomaaliya iyo Wakaaladda Horumarinta Xoolaha dhexmaray Maayo 28, 1974.

Qodobka 2

*Dhaqan gelin*

Sharcigani dhaqso ayuu u dhaqan gelayaa waxaana lagu qorayaa faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 5 Juunyo 1974.

*Jaalle S. G. Mohaxed Siyaad Barre*
GUDDOOMIYAHA G. S. K.

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda
*Jaalle Mohamed Yusuf Weyrax*

**SHARCIGA L. 22, Tr. 18 Luulyo 1974.**

**Isbaddelkii 1aad ee miisaaniyadda 1974.**

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Go'aankii labada Gole ee 18 Luulyo, 1974.

Qodobka 1aad

Isbaddelka lagu sameeyey Miisaaniyadda 1974, sida ka muuqata lifaaqa A, waa la ogolaaday.

Qodobka 2aad

Sharciganu wuxu dhaqan-galayaa 19ka Luulyo, 1974, wuxuuna ka mid noqon doonaa sharciyada Dawladda Soomaaliyeed; waa in laguqoraa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 18 Luulyo 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOOMIYAHA G. S. K.

*Jaalle Mohamed Yusuf Weyrax*
Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda

| MADAX | | Madax-xige | TILMAAN | Qiyastii hore | Isbaddelka | Qiyaasta cusub |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.2.0 | Wasaaradda Maaliyadda | | | | | |
| | Miisaan. Caadiga ah | 5.1.0 b) | Iibsiga qeybta Warshuuca Balacad | 10.000.000 | — 3.880.000 | 6.120.000 |
| 1.8.0 | Wasaaradda Haw. Guud | | | | | |
| | Miisaan. Caadiga ah | 1.2.3 t) | Daryeelidda Guryaha | 3.200.000 | — 1.000.000 | 2.200.000 |
| 1.10.0 | Wasaaradda Beeraha | | | | | |
| | Miisaan. Caadiga ah | 2.2.0 j) | Kaalmada Mash. Cuntada Degdeg ah | 13.000.000 | — 1.000.000 | 12.000.000 |
| | Mashruuca 1aad | 3.1.1 a) | Mashruuca Faanoole | 11.000.000 | — 2.000.000 | 9.000.000 |
| 1.11.0 | Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa | | | | | |
| | Mashruuca 2aad | 1.2.2 a) | Iibsiga Baabuurta iyo Cagf-cagafyada | 200.000 | — 200.000 | — |
| | Mashruuca 2aad | 1.2.2 b) | Iibsiga qalabka shaybaadhka | 20.000 | — 20.000 | — |
| | Mashruuca 7aad | 1.2.2 a) | Qalabka dhibka | 200.000 | — 200.000 | — |
| | Mashruuca 7aad | 1.2.2 b) | Iibsiga Baabuurta | 120.000 | — 120.000 | — |
| 1.13.0 | Wasaaradda Sancada | | | | | |
| | Mashruuca 1aad | 3.1.1 a) | Warshadda Sibidhka | 9.000.000 | — 3.000.000 | 6.000.000 |
| 1.14.0 | Wasaaradda Gaadiidka | | | | | |
| | Miisaan. Caadiga ha | 1.2.1 b) | Batroolka, Naaftada iyo Saliidda | 3.950.000 | — 200.000 | 3.750.000 |
| 1.15.0 | Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta | | | | | |
| | Miisaan. Caadiga ah | 1.2.1 a) | Daabacaadda tikidhada Boostada | 450.000 | — 150.000 | 300.000 |
| | Miisaan. Caadiga ah | 1.2.1 t) | Batroolka, Naaftada iyo Saliidda | 500.000 | — 150.000 | 350.000 |
| | Miisaan. Caadiga ah | 1.2.2 b) | Qalabka boostada | 180.000 | — 80.000 | 100.000 |
| | Miisaan. Caadiga ah | 1.2.8 b) | Qaadista boosaha | 600.000 | — 220.000 | 380.000 |
| 1.18.0 | Wasaaradda Dalxiiska | | | | | |
| | Miisaan. Caadiga ah | 1.2.4 a) | Iibsiga buugaagta iyo wargeysyada | 150.000 | — 150.000 | — |

| MADAX | Madax-xige | TILMAAN | Qiyastii hore | Isbaddelka | Qiyaasta cusub |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.19.0 Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta | | | | | |
| Miisaan. Caadiga ah | 1.2.1 b) | Cuntada . . . . . . . . . . | 2.800.000 | — 700.000 | 2.100.000 |
| » » | » j) | Qalabka waxbarashada . . . . . . | 1.710.000 | — 85.000 | 1.625.000 |
| » » | » kh) | Waxbaridda dadka waaweyn . . . | 100.000 | — 32.000 | 68.000 |
| » » | 1.2.2 b) | Qalabka ciyaaraha . . . . . . . | 50.000 | — 15.000 | 35.000 |
| » » | 2.2.0 a) | Kaalmada dugsiyada (Unesco-Unicef) | 200.000 | — 168.000 | 32.000 |
| » » | 2.2.0 b) | Kaalmada dugs. Xalane iyo Ceel Jaalle | 2.000.000 | — 1.000.000 | 1.000.000 |
| Mashruuca 2aad | 3.1.1 | Dhismaha cusub . . . . . . . . | 3.500.000 | — 3.000.000 | 500.000 |
| » 3aad | 1.2.1 a) | Botroolka, Naaftada iyo Saliidda . . | 150.000 | — 100.000 | 50.000 |
| » » | 1.2.1 b) | Daabacaadda iyo alaabta waxbarash. | 600.000 | — 450.000 | 150.000 |
| » » | 1.2.4 | Buugaga, wargeysyada iyo faafinta . | 1.000.000 | — 900.000 | 100.000 |
| » » | 1.2.8 a) | Noolka alaabta . . . . . . . . . | 20.000 | — 20.000 | — |
| » » | 1.2.8 b) | Kharashka lama filaanka ah . . . | 30.000 | — 30.000 | — |
| 1.21.0 Wasaaradda Caafim. | | | | | |
| Miisaan. Caadiga ah | 1.2.8 s) | Kaalmada Cusb. Guud ee Xamar (D.) | 3.000.000 | — 250.000 | 2.750.000 |
| 1.23.0 Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta | | | | | |
| Miisaan. Caadiga ah | 1.2.3 a) | Alaabta baahitirka idaacadda . . . | 1.350.000 | — 100.000 | 1.250.000 |
| Mashruuca 1aad | 3.1.1 a) | Ballaarinta hadal-tabiyaha Raad. Harg. | 1.800.000 | — 1.800.000 | — |
| » 2aad | 1.2.2 | Qalabka hawsha socota . . . . . . | 750.000 | — 100.000 | 650.000 |
| » » | 3.1.1 | Dhismaha cusub . . . . . . . . | 300.000 | — 100.000 | 200.000 |
| » » | 3.1.2 a) | Makiinadaha hadalka . . . . . . | 750.000 | — 400.000 | 350.000 |
| | | Isugeyn | 72.680.000 | —21.620.000 | 51.060.000 |

| MADAX | Madax-xige | TILMAAN | Qiyastii hore | Isbaddelka | Qiyaasta cusub |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.11.0 Wasaaradda Xoolaha, Dhir. iyo Daaqa Mashruuca 16aad (Horumarinta Reer Miyiga) | 1.2.1 a) | Daawada xoolaha . . . . . | — | + 6.000.000 | 6.000.000 |
| 1.19.0 Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta Mashruuca 7aad (Horumarinta Reer Miyiga) | 1.2.1 a) | Batroolka, Naaftada iyo Saliidda . . | — | + 1.250.000 | 1.250.000 |
| Mashruuca 7aad (Horumarinta Reer Miyiga) | 1.2.1 b) | Alaabta ololaha . . . . . . . . | — | + 1.200.000 | 1.200.000 |
| Mashruuca 7aad (Horumarinta Reer Miyiga) | 1.2.6 a) | Sahayda ardayda barayaasha ah . . | — | + 6.000.000 | 6.000.000 |
| Mashruuca 7aad (Horumarinta Reer Miyiga) | 1.2.6 b) | Sahayda shaqaalaha Dawladda . . . | — | + 1.670.000 | 1.670.000 |
| 1.21.0 Wasaaradda Caafimaadka Mashruuca 12aad (Horumarinta Reer Miyiga) | 1.2.1 a) | Daawada dadka . . . . . . . . | — | + 4.700.000 | 4.700.000 |
| Mashruuca 12aad (Horumarinta Reer Miyiga) | 1.2.2 b) | Qalabka Caafimaadka . . . . . . | — | + 800.000 | 800.000 |
| | | Isugeyn | — | +21.620.000 | 21.620.000 |

SHARCI L. 23, Tr. 18 Luulyo 1974.
Magacaabid Gobolka Banaadir.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciyada summadahoodu kala yihiin L. 13 soona baxay 13kii Luuliyo 1965kii, L. 52 soona baxay 8dii Juun 1972 iyo D. L. 121 soona baxay 17kii Sep. 1972kii;

ISAGOO AGOONSAN inay tahay lagama maarmaan in magaalada Xamar laga dhiso Gobol cusub, laguna magaacaabo «Gobolka Banadir»;

ISAGOO TIXGEL. Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA HOOS KU QORAN

Qodobka 1aad

*Magaalada Xamar waxaa laga dhigay Gobol*

Magaalada Xamar waxaa laga dhigay Gobol, laguna magacaabay «Gobolka Banaadir» wuxuuna ka kooban yahay 14 Degmo.

Qodobka 2aad

*Guddoomiyaha Gobolka*

1. Duqa Magaalada Xamar wuxuu ahaanaya Guddoomiyaha Banaadir.
2. Kuxigeenayaasha Duqa Magaalada Xamar waxay ka mid noqonayaan Guddiga Kacaanka ee Gobolka Banaadir.

Qodobka 3aad

*Xoghayaha Gobolka*

Guddiga Kacaanka ee gobolka Banaadir dhismihiisa waxaa lagu darayaa «Xoghaye» la mid ah kuwa Gobolada kale ee J.D.S.

Qodobka 4aad

*Guddiga Kacaanka ee Gobolka*

Afarta qof ee Degma kasta oo ka mid ah Gobolka, ugu jirta Golaha Kacaanka ee Gobolka, waxay ka mid noqondoonaan Guddiga Kacaanka ee Degmadooda.

Qodobka 5aad

*Tirtir*

Sharci kasta ee khilaafsan ama aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 6aad

*Hirgelin*

Sharcigaani wuxuu si degdeg ah u hirgelayaa markii uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmigaa ee Dawladda.

Muqdisho, 18 Luliyo 1974.

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**SHARCI L. 24, Tr. 18 Luuliyo 1974.**

**Toosinta Sharciga Wakaladda Horumarinta Xoolaha ee lambarkiisu yahay 34 ee soo baxay 26 Juun, 1970.**

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO TIXGELINAHA go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU DHAQAN GELINAYAA

*Toosinta hoos ku qoran ee sharciyada Wakaladda Horumarinta Xoolaha*

QAYBTA HORE

Qodobka 1aad

1. Erayada soo socda haddaan meelaha ay ku jiraan lagu caddayn ulajeedooyinkooda waxay noqon doonaan sida hoos ku qoran:

b) «WAKAALADDA» waxaa loola jeedaa Wakaaladda Horumarinta Xoolaha (WHX).

t) «XOGHAYAHA» waxaa loola jeedaa Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga Dibadda.

j) «XOOLAHA» waxaa loola jeedaa ari, geel, lo' iyo digaag

x) «WASAARADDA» waxaa loola jeedaa Wasaaradda Ganacsiga Dibedda ee Wakaaladdanu ku xirantahay.

kh) «HILIB» waxaa loola jeedaa hilib markaa la qalay, hilib la qaboojiyay, iyo hilib qasacado lagu riday.

2. Wakaaladdu waxay ahaan doontaa mid madax bannaan oo jirid iyo awood sharci ah leh sida uu muujinayo sharciga tirsigiisu yahay 16 taariikhdiisuna tahay 1, Abril 1970 waxayna u hogaansanaan doontaa sharciyada hoos ku qoran:

b) Sharciga tiradiisu tahay 36 soo baxay 22kii Abril 1972 ee ku saabaanaa Maamulka Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan;

t) Xeerka Shaqaalaha wekaaladaha Madaxa Bannaan (D.P.S.R.C. Lam. 74 ee 22kii Abril 1972) hadda kadibna lagu tilmaami doono xeerka shaqaalaha;

j) Xeerka tiradiisu tahay 58 ee soo baxay 31kii Luulyo 1972.

## Qodobka 2aad

1. Wakaaladda ilaalinteeda guud waxaa yeelan doona Wasaaradda Ganacsiga Dibedda, oo hadda ka bacdi xeerkan lagu tilmaami doona «Wasaaradda».

2. Xarunta Wakaaladdu waxay noqon daantaa Xamar Laamana waxay ku yeelan doontaa Gobollada iyo Degmooyinka.

## Qodobka 3aad

1. Wakaaladdu waxay awood u leedahay ilaalinta iyo habaynta, iibka, dhaqdhaqaaqa, gadidda, soo dejinta iyo dhoofiska dhammaan xoolaha, digaagga, hilibka, ukunta, iyo waxyaalaha kale ee noolaha laga helo si ay u hirgeliso ulajeedooyinka loo dhisay.

Waxyaalaha Wakaaladdu awood u leedahay waxaa ka mid ah:

b) Dhismaha, lahaanshada iyo maamulka xeryaha daaqa, beeraha cuntada xoolaha, sayladaha meelaha xoolaha lagu nasiyo iyo waddooyinka xoolaha ganacsiga ahi ay maraan;

t) Maamulka iyo hagaajinta sayladaha xoolaha iyo digaagga;

j) Dhismaha iyo maamulka waddooyinka xoolaha iyagoo biyo iyo daaqba leh si xoolaha ganacsiga ah ee sayladaha ka imaanaya ay ku gaaraan meelihii loo wadey iyagoo aan waxyeelo ku dhicin;

x) In ay soo abaabusho, qiimaha xoolaha, hilibka, ukunta, iyo waxyaalaha xoolaha laga helo markii loo garta in danta caamka

ah ee dhaqaalaha dalka ay ku jirto. Waxaana lagama maarmaan ah in mar walba Dawladdu la ogoshahay;

kh) In ay diyaariso, dhisto, dhaqan geliso daw hagaagsan oo miisaan iyo «grade» loogu kala iibsado xoolaha, hilibka, digaagga, ukunta iyo waxyaalaha xoolaha laga helo;

d) In ay goyso, dhaqan geliso, uruuriso lacagta laga qaadayo xoolaha isticmaalaya wax allaale wixii hawl ah ay Wakaaladdu u qabatay xoo lahaas dentoodu tahay ganacsi dibadeed ama dalka gudihiisa;

r) In ay la wareegto socodsiisana siinta hilibka, digaagga, iyo waxyaalaha ka soo baxa magaalooyinka waaweeyn iyo warshadaha;

s) In ay la kalkaaliso Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa ilaalinta iyo ciribtiridda cudurrada xoolaha;

sh) In ay wixii alaab ah (Agricultural equipment, seeds, foods, pumps and irrigation equipment, fertilizers, veterinary drugs and vaccines and any other equipment) wakaaladdu haysan karta si ay haalaheeda u hirgeliso;

c) In ay gadato iibisana xoolaha iyo waxyaalaha laga helo gudaha iyo dibaddaba;

f) In ay dhisto socodsiisana xeryaha karantiinka xoolaha si ay u hubiso in caafimaadka xoolaha dhoofka ahi la mid yahay heerka addunka;

q) In ay gacan ku siiso xubnaha loo xilsaaray xirmooyinka siyaalaha xoolaha daaqooda loogu isticmaalayo;

k) In ay deristo oo kaalmayso sidii lagu xallili lahaa ummuuraha hor taagan horumarinta xoolaha iyo warashadaha ku xiran lana xiriira markii kaalmadeeda loo baahdo;

l) In ay wereegto markii ugu habhoon dhammaan xoolaha iyo waxyaalaha ka soo baxa iib geeyntooda dibedda. Arrintan waxaa lagu hirgelinayaa xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka iyadoo la tixgelinayo talada Xoghayaha Ganacsiga Dibedda;

m) In ay la kaashato hayadaha addunka amase xubnaha kala (business concerns or private persons) hirgelinta mashaariicda hawlaheeda la xiriira iyada oo uu ogolaaday Xoghayaha.

2. Ulajeedadii Wakaaladda ee lagu caddeeyay qodobka 4aad ee tixda 5aad ee sharciga 34aad ee 26kii Juun, 1970 waa la baabi'yey.

3. Wakaaladdu waxay leedahay wixii awood ah ee kale ee ay ugu baahantahay in ay hawlahaada ku gudato.

## QAYBTA 2aad

### Qodobka 4aad

*Xubnaha Wakaaladda*

Xubnaha Wakaaladdu waxay ahaan doonaan:

b) Maareeyaha Guud;

t) Waaxyo ama qaybo ay Wakaaladdu yeelan doonto, kuwaasoo la abuuri doono marka xeer loo sameeyo dhismaha (Establishment) Wakaaladda.

### Qodobka 5aad

*Shaqaalaha Wakaaladda*

1. Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaasha Wakaaladda waxaa lagu qori doonaa xeerka Guddoomiyaha Sare ee Kacaanka iyadoo la tixgelinayo talada Xoghayaha.

2. Wakaaladdu way qoran kartaa wixii shaqaala ah oo u baahato iyadoo u hoggaansamaysa qaanuunka tiradiisu tahay 35 ee 22kii Abril 1972 iyo xeerkii D.P.S.R.C. Lam. 74 ee soo baxay 22kii Abril 1972.

### Qodobka 6aad

*Xilka Maareeyaha Guud*

Xilka saaran Maareeyaha Guud ee Wakaaladdu wuxuu yahay: inuu fuliyo waxa uu farayo sharcigani iyo wixii kale ee dhaqan sharci leh, siyaadda iyo habka shaqada maamulkeeda.

### Qodobka 7aad

*Habka iyo shuruudda shaqada*

Habka iyo shuruudda shaqada, taasoo ay ku jirto mushaharka Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha Wakaaladda iyo shaqaalaha kaleba, waxaa xukumi doona qaanuunka Wakaaladaha madaxa bannaan iyo xeerkii shaqaalaha sida lagu soo sheegay qodobka 1aad xarfaha (b) iyo (t) ee qaanuunka.

### Qodobka 8aad

*Amaaho sharci ah*

Wakaaladdu si ay u hirgeliso hawlaheeda wax waa amaahan kartaa ka hawlheeda Dawladda, meelaha ku habboon ee lacagta lagu kaydiyo (Financial institutions) waddanka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soo-

maaliya gudihiisa ama dibeddiisa iyadoo haysata guddoonka Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga Dibeedda, iyo Xoghayaha Dawladda, eeWasaaradda Lacagta.

Qodobka 9aad

*Misaaniyadda iyo xisaab-xirista sannadka*

1. Maareeyaha Guud, iyadoo aanay ka dambayn karin 31ka Diisember sannad walba waa inuu isku soo dubbaridaa miisaaniyaddii taasoo muujinaysa wixii soo gali kara ama ka bixi kara Wakaladda sannadka soo socda. Bandhigga miisaaniyadda ee sannadka waa in la hor dhigo Wasaaradda Ganacsiga Dibedda iyo Lacagta.

2. Markay tahay 31ka Maarso ama inta ka horraysa sannad walba, Maareeyaha Guud waa inuu isku hagaajiyaa xisaabtii sannadkaa iyo bandhiggii macaashka ama khasaaraha Wakaaladda taana uu u soo gudbiyaa Wasaaradda Ganacsiga Dibedda iyo Wasaaradda Lacagta.

Qodobka 10aad

*Xisaabta Sannadka (Financial yar)*

Sannadka maaliga ah ee Wakaaladdu wuxuu ka bilaabmayaa 1da Jannaayo kuna dhammaaneyaa 31ka Diisember, sannad walba.

Qodobka 11aad

*Maamulka Xisaabta*

Wakaaladdu had iyo jeer, waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa adduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan iyadoo si habboon u dhowraysa qaanuunka lambarkiisu yahay 58 ee soo baxay 31ka Luulyo 1972 iyo xeerarka Qaranka.

Qodobka 12aad

*Xisaabaha Wakaaladda Baridooda*

Xisaabaha Wakaaladda waxaa baari doona Laanta gaarka ah ee ka tiraan Xafiska Hantidhawrka ee Madoxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, loona sameeyey baarista Wakaaladda Madaxa Bannaan

Qodobka 13aad

*Sharciyada Gaarka ah (Regulations)*

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka wuu soo saari karaa sharci gaar ah si loo dhaqan geliyo qaanuunkan, isgoo tixgelinaya talada Xoghayaha.

Qodobka 14aad

Xoghayuhu, isagoo la tashanaya Maareeyaha Guud, wuxuu sameyn karaa sharciga habka lagu dhaqan gelinayo fulinta hawlaha gudaha ee Wakaaldda.

Qodobka 15aad

*Tirid sharciyadii hore*

Sharciga lambarkisu yahay 14 ee soo baxay 11kii Nofember 1973 iyo wixii sharci ah ee ka hor yimaada ama aan la soconin sharcigan, waa la tirtiray.

Qodobka 16aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa waqtigii uu saxeexo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka kaddibna waxa lgu soo saari doonaa Faafinta Rasmig ah ee Dawladda.

Muqdisho, 18 Luulyo 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
MADAWSYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**LAW No. 24 of 18 July 1974.**

**Amendment by Law No. 34 of 25 June 1970, Governing Livestock Development Agency.**

THE PRESIDENT

OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

The President of the Supreme Revolutionary Council Taking Note of the approval of the Supreme Revolutionary Council and the Council of Secretaries;

HEREBY PROMULGATES

The following amendment to the Laws Governing Livestick Development Agency.

## CHAPTER I.

### Article 1

1. Wherever used in this Law, unless the context otherwise requires, the following terms shall have the following meanings:

a) «AGENCY» means the Livestock Development Agency (LDA).

b) «SECRETARY» means the Secretary of State for Foreign Trade.

c) «LIVESTOCK» means cattle, camels, sheep, goats and poultry.

d) «MINISTRY» means the Ministry of Foreign Trade under which the Agency comes.

e) «MEAT» means fresh, chilled, frozen or canned meat.

2. The Agency shall remain an autonomous body with juridical personality as provided by Law No. 16 of 1st April, 1970. In addition the Agency shall be subject to the provisions of the following Laws:

a) Law No. 36 of 22nd April 1972 on Personnel of Autonomous Agencies;

b) Presidential decree No. 74 of 22nd April 1972 on Staff Regulations of Autonomous Agencies hereinafter called «Staff Regulations».

c) Law No. 58 of 31st July 1972 on Finance of Public Enterprises and Agencies.

### Article 2

*Organisation*

1. The Agency shall function, under the supervision of the Ministry of Foreign Trade, hereinafter referred to as the «Ministry».
2. The Agency shall have its head Office in Mogadishu but it may have offices in other regions and districts.

### Article 3

1. The Agency shall have and exercise such powers to control and regulate the purchase, possession, movement, sale, import and export of all livestock, poultry, meat, eggs and by-products, as may be necessary in order to carry out its objectives, and purposes.

The Agency shall inter alie have power to:

a) Construct, own and operate holding grounds, grazing ranches, irrigated farms, feedlots, marketing places, stock routes, staging points and marshalling yards.

b) Operate and direct livestock and poultry markets.

c) Establish and operate stock routes with watering facilities and reserved grazing areas to enable livestock to be moved from primary markets to processing facilities or exportation points, in the best possible condition.

d) Formulate, the pricing policy of livestock, meat, eggs and by-products when considered necessary from the standpoint of the national economy, and to seek Government concurrence on said pricing policy.

e) Draw up and establish reliable weighing procedure and grade specifications for livestock, poultry, meat, eggs and by-products and enforce the same.

f) Fix, impose and collect fees on all livestock using the facilities provided by the Agency for meat, poultry and by-products exported from or processed in Somalia.

g) Take over and carry out the supply of meat, poultry, eggs and by-products to the urban centres and also the supply of livestock to the livestock processing plants.

h) Cooperate, with the Ministry of Livestock, Forestry and Range for the effective control and eradication of livestock diseases.

i) Import and provide Veterinary drugs and vaccines, agricultural equipment and machinary, feeds, pumps and other equipment required for irrigation as well as any other items as may be required for LDA's overall operation.

j) Buy and sell livestock and livestock products both domestically and abroad.

k) Establish and operate quarantine stations for livestock in order to ansure international standards of health control in respect of livestock for export.

l) Cooperate with the outhorities concerned in the implementation of proper measures to be taken for utilization of grazing areas by stock-owners.

m) Study, and assist in solving any problem, pretaining to the development of the livestock and related and associated industries as and when LDA's assistance is called for by the authorities concerned with livestock development.

n) Take on, whenever appropriate, the exclusive export of livestock, livestock products and related products. The right to exclusive export shall be established by decree of the President of the Supreme Revolutionary Council on the proposal of the Secretaries of State concerned with livestock development.

o) Participate with international organizations, business concerns, or private persons for carrying out projects within the competence of the Agency with the prior approval of the Secretary.

2. The objective of the Agency specified in article 4 paragraph 9 of Law No. 34 of 26 June 1970 is hereby repealed.

3. The Ageicy shall have all other powers as shall be deemed necessary for the proper echievement of its functions.

## CHAPTER II.

### Article 4

*Organs of the Agency*

The Agency shall have the following organs:

a) The General Manager.

b) Departments which the Agency shall establish when the Regulations of the Establishment of the Agency are enacted.

### Article 5

*Staff of the Agency*

1. The General Manager and the Heads of Deparment of the Agency shall be ap pointed by the Decree of the President of the Supreme Revolutionary Council on the proposal of the Secretary.

2. The Agency may appoint other staff whenever it needs, according to Law No. 36 of 22nd April, 1972 and the Decree of PSRC No. 74 of 22nd April, 1972.

### Article 6

*Functions of the General Manager*

The responsibility of the General Manager of the Agency is to administer the Agency according to this Law in its best interest.

## CHAPTER III.

### Article 7

*Terms and conditions of service*

The terms and conditions of service including the emoluments of the General Manager, Dnrectors and other staff of the Agency shall be subject to provision of the Law on Autonomous Agencies and the Staff Regulations as set out in Article 1, (b) and (c) of the said Law.

### Article 8

*Authorized loans of the Agency*

The Agency may, for the purposes of its activity, obtain loans from the Government and financial institutions within the Somali Democratic Republic and abroad with approval of the Secretary of State for Foreign Trade and the Secretary of State for Finance.

### Article 9

*Budget and Annual Accounts*

1. The General Manager shall, not later then 30th September each year cause to be prepared the Annual Budget Statement showing the estimated receipts and expenditure of the Agency. The Annual Budget Statement shall be submitted to the Ministries of Foreign Trade and Finance.

2. On or before 31st March each year, the General Manager shall cause to prepare the Annual Accounts and profit and loans statement of the Agency which shall also be submitted to the Ministries of Foreign Trade and Finance.

### Article 10

*Financial year*

The financial year of the Agency shall begin from 1st January and end on 31st December each year.

### Article 11

*Maintenance of Accounts*

The Agency shall, at all times, keep proper accounts of its Funds and other money transactions, which shall be maintained in accordance with Law No. 56 of 31st July, 1972 and other laws of the Somali Democratic Republic.

### Article 12

*Audit of Accounts*

The Accounts of the Agency shall be audited by a separate unit established in the Office of the Magistrate of Accounts for the purpose of auditing Autonomous Agencies.

Article 13

*Regulations*

The President of the Supreme Revolutionary Council may, by Decree, on he proposal of the Secretary, issue Regulations for the proper implementation of this Law.

Article 14

*By Laws*

The Secretary, in consultation with the General Manager may form internal Rules for the proper organization and functioning of the Agency.

Article 15

*Repeal*

Law No. 14 of 11th November 1973 and any other Law or provision contrary to or inconsistant with this Law is hereby repealed.

Article 16

*Entry into Force*

This Law shall some into force on the day it is signed by the President of the Supreme Revolutionary Council and shall be publisshed in the Bulletin of the State.

Mogadishhu, 18 July 1974.

*Maj. General Mohamed Siad Barre*

PRESIDENT

of the Supreme Revolutionary Council

# BOGGA LABAAD

## Xeer

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 17 Maarsa 1974, L. 63.

Xeer Guddoomiyaha. Golaha Sare ee Kacaanka Magacaabid Guddoomiyayaal Maxkamadaha Racfaanka, Maxkamadda Gobolka iyo Kuxigeen, Xeer Ilaaliye Guud.

MADAXWEYNAHA G. S. K.

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga dhiska Maxkamadaha ee tiradiisu yahay 3 ee soo baxay 12-6-1972 iyo wixii laga beddelay;

ISAGOO ARKAY Xeerkii 12aad ee soo baxay 25-10-1969;

ISAGOO AGOONSAN In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Xeer ilaaliye Guud oo cusub iyo Guddoomiyaal cusub Maxkamadaha Racfaanka, Maxkamadda Gobolka iyo kuxigeen Xeer Ilaaliye Guud;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.

WUXUU MAGACAABAYAA GARSOORAYAASHA HOOS KU QORAN

Qodobka 1

1) Dr. Maxamed Xasan Taanj — Xeer Ilaaliyaha Guud Kumeelgaar ah ee Qaranka.

2) Dr. Yuusuf Cilmi Rooble — Guddoomiyaha Maxmakadda Racfaanka Sh. Dhexe.

3) Dr. Abuukar Macallim Cabdulle — Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Jubada Hoose.

4) Dr. Xuseen Shiikh Cabduraxman — Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Mudug.

5) Dr. Maxamed Cali Xaamid — Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Muqdisho.

6) Dr. Maxamed Xasan Saciid — Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Bakool.

7) Dr. Cabduraxman Xuseen Samantar — Guddomiyaha Maxkamadda Racfaanka Sh. Hoose.
8) Dr. Yasiin Shire Faarax — Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Muqdisho.
9) Dr. Bashiir Cartan Dirir — Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Muqdisho.
10. Dr. Xasan Dhimbil Warsame — Kuxigeenka Xeer Ilaaliyaha G. Xamar.
11) Garsoore Xasan Yuusuf Nuur — Waxaa loo beddelay Maxkamadda Badbaadinta Dalka.
12) Dr. Cabduraxman Xaaji Murshid — Garsoore Maxkamadda Gobolka Muqdisho.
13) Dr. Maxamuud Shiikh Faarax — Guddoomiyaha Guddiga Canshuuta Degdegga ah (Commissione fiscale).

Qodobka 2

Dikreetada si degdeg ah bay u dhaqan galeyaa, waxaana lagu soo saari doona faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Maarso 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA G. S. K.

*Dr. Cabdisalaam Sh. Xuseen*
Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

*Jaalle Maxamed Yuusuf Weyrax*
Xoghayaha Dawladda Wasaaradda Maal.

*VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 206.*
*Mogadiscio, 23 Maggio 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI F.

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 17 Abril 1974, L. 64.**
**Dallacaad la siiyay Dhamme Maxamed Jaamac Ducaale derejada Gaashaanle.**

MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA
MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY Xaashidii kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaanuunkii kowaad ee 21kii Oktoobar, 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga 14naad ee soo baxay 3dii Juun 1962 kuna saabsanaa kowaad hannaanka Dawladda qodobkiisa 7;

ISAGOO ARKAY Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Xabsiyada;

ISAGOO TIXGELIYEY Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha kuna soo sheegay xaashidiisii L. C-C-7-669 ee 26-12-1973;

ISAGOO AQOONSADAY Sarkaalka hoos ku magacaaban in la dallacsiiyo iyadoo la tixgelinayo kartidiisa iyo wuxuu mutaystay;

ISAGOO HUBIYEY Inay jagooyin ka bannaan yihiin talagalka tirada joogta ee Saraakiisha Xabsiga;

ISAGOO DHEGEESTAY Ra'yigii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta;

WUXUU XEERAYA

Qodobka 1

In Dhamme Maxamed Jaamac Ducaale la dallacsiiyo lana siiyo derejada Gaashaanle marka laga bilaabo 1da Jannaayo, 1974 kuna hirgelaysa xagga sharciga iyo dhaqaalaha.

Qodobka 2

Xeerkanu degdeg buu u dhaqmo geleyaa, waxaana lagu dhigi doonaa faafinka rasmiga ah.

Muqdisho, Tr. 17 Abrile 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA G. S. K.

*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sh. Xuseen*
Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Garsoorka iyo Diinta

